

**SHARCI - Lamb. 48 ee 2 Agoosto 1972**

**WAX KA BEDDELID XEER NIDAAMIYAHA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA**

**MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

KADIB markii la arkay talada Xoghayahayaasha Dowladda;  
KADIB markii laga baaran degey oggolanshaha Golaha Sare ee Kacaanka;

**WUXUU SOO SAARAYAA:**

Sharcigaan hoos ku qoran:

**Qod. 1**

Waxaa wax laga beddelay Qod. 28 ee Sharciga 1 Abriil ee 1970 ee Xeer Nidaamiyaha Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda, shaqaalaha dumarka ah ee Dowladda oo ah xaasaska shaqaalaha Diblomaasiyiinta ee dalka dibediisa jooga, waxaa loo beddeli karaa goobta ay saygoodu joogaan iyadoo laga shaqa gelin doono isla safaaraddas. Muddada ay la joogi doonaan saygoodu dalka dibediisa waxaa la mid tahay fassax aan caadi ahayn xaqna uma laha wax mushaar ah.

**Qod. 2**

Waxaa wax laga beddelay qod. 1 ee sharciga lamb. 15 ee 4 Maarso 1971 ee 'Wax ka beddelid Xeer Nidaamiyaha Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda' iyado ugu horreynti la baari doono in ay jirto jago banaan iyo lacag ku filan, Safiirku wuxuu:

- a) u qori kara xaasaska xubnaha shaqaalihiiisa diblomaatiga ah jago aan joogta ahayn oo ku meel gaar ah;
- b) shaqaaleynta lagu helay habka ku qoran xarafka (a) ma uu siin doonto qofkaasi xaq in uu ku helo shaqo dowladda.

**Qod. 3**

Looma qaadan doono shaqaale ku meel gaar ah ama shaqaale safaarada xaaska Madaxa Saldhigga Diblomaasiyada. Shaqaalaha dowladda ee ka tirsan Safaaradda, waxaa loogu tala galay in fassax aan caadi ah ku jiraan ilaa iyo intii ay ku sugan yihiin dibedda.

**Qod. 4**

Sharcigaani wuxuu hirgeli doona sida ugu dhaqsida badan waxaana lagu soo daabici doona Faafinta Rasmiga ee shuruucda iyo dekreetoyinka Jamhuuriyadda Dimuqratiga ee Somaliaya.

Muqdisho 2 Agoosto 1972.

Madaxweynaha  
Golaha Sare ee Kacaanka  
**Sareeye Guuto Mohamud Siyaad Barre**